

## **Hadda carruurta iyo da'yartuba waxa ay dib u bilaabayaan iskuuladii.**

**Hadda waxaa dib u bilaabanaya iskuuladii mar kale. Ardayda dugsiga sare iyo jaamacadda ayaa markii ugu horraysay in dhowr bilood ah ka dib dib ugu laabtay iskuuladii. Laakiin cudurkii ma dhammaan, waana in qof walba raaca talooyinka hay'adaha caafimaadka.**

Ardayda dugsiyada sare xilligii gu'ga , guryaha ayey wax ku baranayeen, haddase iskuulka ayey aadayaan. Iskuulada gobolka waxa ay ku dhaqmayaan nadaam cusub, fasalada waxaa loo qaabeeyey hab ardayda iyo macalimiintuba ay ku raaci karayaan nadaamka. Iskuullo badan waxa ay bedeleen jadwalkoodii, si ay ardaydoo idil ugu baahan in ay marqura isku meel joogaan.

Da'yarta 20 -29 jirka ah waa kuwa ugu liita raacidda sharciga. Hay'adda caafimaadka istaastikadeeda baa taas tusaysa. Waana kuwa hadda ugu badan qaadida cudurka iyo fidintiisaba. Sidaa daraadeed baa jaamacaduhu yeelanayaan sharciyo iyo weliba iney hubiyaan in dhalintu foajignaato.

**Dugsiyada hoose/dhexena sidoo kale waxa ay raacayaan sharciga.**

Carruurta dugsiga hoose/dhexe xiligii gu'ga wey teegen iskuulada. In yar oo

macalimiinta iyo ardada ah baa u xanuunsatay caabuqa Corona. Sidaa daraadeed bey haya'adda caafimaadku u ogolaatay in carruurta sii wataan tagidda dugsiyada.

"Carruurta cudurka wey qaadi karaan" ayey tiri Lisa Labbé Sandelin oo ah dhakhtarad cudurada faafa ee gobolka "laakiin ma badna iney cudurka sii gudbiyaan" bey raacisay.

Gobolka kalmar mar aan dheereyn waxaa la xiray dugsiga xanaanada carruurta. Qaar ka mid ah shaqaalaha ayuu cudurku ku dhacay. Kammuunka iyo dhakhtarka cudurada faafa ayaa go'aamiyey in iskuulkaa la xiro si'aaney in kaloo badanoo shaqaalaha ah cudurka u qaadin.

Xanaanadu way xirnaan doontaa dhawr maalmood inta shaqaalaha la baarayo. Kadib waa la furi doonaa. Hadii ay dhacdo taasoo kale , dugsiyada xanaanada ama kuwa kaleba waa la xirayaa haddii loo baahdo. Waalidiinta iyo ardaydana waxaa wargelin doona iskuulka.

Dhamaan dugsiyada qaybahooda kala duwan , waa in ay sii wadaan raacidda sharciga.

Carruurta wixii leh calaamadah cudurka waa in ay guriga joogaan. Waana in aaney dad badan soo doonin carruurta ama keenin dugsiyada.

Waxaa jira sharciyo kala duwan oo iskuulada iyo kamunadu leeyihiin. Ogow sharciga iskuulkaada u yaal.



**Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.** Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar